
**WASAARADDA BEERAHA IYO WARAABKA**

# QABYO-QORAALKA SIYAASADDA QARAN EE WARAABKA




**2019**

**JADWALKA TUSMADA**


**MAHADNAQ** ____ III

**GOGOLDHIG** ____ IV

**1 HORDHAC** ____ 1

1.1 Xaaladda Guud ee Dalka ____ 1

1.2 Gogoldhig ____ 2

1.3 Taariikhda Macluumaadka Waraabka Soomaaliya ____ 3

1.4 Caqabadaha Qaybta Waraabka ____ 7

1.5 Fursadaha qaybta waraabka ee Soomaaliya ____ 10

1.6 Sababta Siyaasadda Waraabka ____ 12

**2 SIYAASADDA IYO ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE WARAABKA** ____ 13

2.1 Yoolka Siyaasadda ____ 13

2.2 Howlgalka Siyaasadda ____ 13

2.3 Himilada iyo Ujeedada Siyaasadda ____ 13

2.3.1 Himilooyinka Siyaasadda ____ 13

2.3.2 Ujeedooyinka Siyaasadda ____ 13

2.4 Natiijooyinka Siyaasadda ____ 14

2.5 Waxyaalaha Mudnaanta u leh Siyaasadda iyo Meelaha Bartilmaameedka ah ____ 15

2.5.1 Horumarinta Awoodda Hay'adaha ____ 15

2.5.2 Dayactirka Kaabayaasha Waraabka ee Hadda Jira iyo Horumarinta Qorshayaal Cusub ee Waraab ____ 19

2.5.3 Horumarinta waraab joogtaysan ____ 21

2.5.4 Maaraynta waraab joogtaysan ____ 23

2.5.5 Maaraynta xogta iyo cilmi baarista waraabka ____ 25

**3 ISKU-DUBARIDKA HAY'ADEED EE FULINTA SIYAASADDA** ____ 28

3.1 Kaalimaha iyo Waajibaadka Heerarka kala duwan ____ 28

3.1.1 Heerka Qaran ____ 28

3.1.2 Heer Dawlad Goboleed ____ 30

3.1.3 Ganacsiga Gaarka loo leeyahay ____ 31

**4 ISKU-DUWIDDA, KORMEERIDDA IYO QIIMEYNTA** ____ 36

4.1 Hannaanka Isku-duwidda ____ 36

4.2 Kormeerka iyo Qiimeynta ____ 36

4.3 Arrimaha Udub-Dhexaadka ah ____ 37


**List of Figures:**


Jaantuska *1.1 Maabka baraha biyo-xireenada iyo qaabka waraabka labada Webi* ____ 5

## MAHADNAQ

Waxaa Siyaasadda Qaran ee Waraabka la diyaariyey iyadoo loo marayo hoggaanka guud ee Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka oo kaashanaysa Dawlad Goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir. Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay si xushmad iyo qadarin ku jirto ay aad ugu mahadnaqaysaa Waaxda Horumarinta Caalamiga ah (DFID) taageerada maaliyadeed  ee lasoo marsiiyey hay'adda DAI, gaar ahaan mashruuca dhiirigelinta suuqyada Soomaaliya (PIMS ) si loo qoro Siyaasadda Qaran ee Waraabka loona qabto kulamada wadatashiga / ansixinta ee ka dhacay dhammaan Dawlad Goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir, iyo ugu dambayntii, si siyaasadda loogu gudbiyo Golaha Wasiirada si loo ansixiyo.

Waxaa muhiim ah in halkan lagu xuso shaqaalaha Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, heer federaal iyo heer dawlad goboleed, oo kaalin muhiim ah ka ciyaaray diyaarinta iyo ansixinta siyaasadda. Ugu dambeyntii, Wasaaraddu waxay si gaar ah ugu mahadcelinaysaa dhammaan xubnaha daneeyayaasha ee ka qaybgalay kulamada wadatashiga iyo ansixinta siyaasadda oo ka kala dhacay Dawlad Goboleedyada iyo Maamulka Gobolka Banaadir, kuwaas oo u huray waqtigooda ugana qayb qaatay si wax-ku-ool leh, bixiyayna jawaabihii iyo doodihii muhiimka u ahaa diyaarinta qabya qoraalka Siyaasadda Qaran ee Waraabka.

**GOGOLDHIG**

Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ayaa leh waajibaad iyo mas'uuliyaad ka saaran maamulka, horumarinta, isku-dubaridka iyo dib-u-dhiska Qeybaha Beeraha iyo Waraabka ee Soomaaliya oo laga burburiyey mu'asasaadkii, kaabayaashii iyo beerihii intii lagu guda jiray sanadihii dagaalkii sokeeye. Waxay sidoo kale ay u xilsaarantahay in ay abuurto jawi suurtagelin kara dhiirigelinta, fududeynta, kor u qaadista beeraha, qiima-ku-daridda iyo fursadaha ganacsiga beeraha. Beeraha ayaa ah qaybta ugu muhiimsan ee dhaqaalaha Soomaaliya iyadoo waxqabadkeeduna muhiim u yahay heerka guud ee kobaca dhaqaalaha (GDP). Qaybta beerahu waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa xaqiijinta sugnaanta cuntada, shaqo abuurista, kor-u-qaadista dakhliga iyo sidoo kale dakhliga sarrifka lacagaha qalaad. Dhab ahaantii, qiyaastii 70% dadka dalka deggan, in ka badan 8.5 milyan, waxay ku nool yihiin miyiga waxayna noloshoodu ku tiirsan tahay beeraha, xoolaha iyo hawlaha la xiriira.

Waqtigan xaadirka ah, dowladdu waxay xoogga saaraysaa horumarinta qaybta waraabka si loo taabageliyo si buuxda awoodaha habka waraabka iyadoo gacan ka geysaneysa taageeridda beeraleyda si loo hagaajiyo habdhaqanada maaraynta waraabka iyo horumarinta hababka waraabka ee casriga ah. Iyadoo la fiirinayo natiijadii ka dhalatay dagaalkii sokeeya ee daba dheeraaday, badi kaabayaashii horay u jiray ee waraabka iyo xakamaynta daadadka (carra-tuurka, baaratooyinka, kanaalada iyo keydadka biyaha) lama ilaalin, si ku filana uma shaqeeyaan hadda. Iyadoo taa laga duulayo, waxay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ogaatay in ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo Siyaasadda Qaran ee Waraabka iyadoo ay ugu wacantahay qaybta waraabka oo aan nidaamsaneyn iyo isticmaalka hab-dhaqanadii hore ee waraabka iyo biyo yaraanta ba'an ee Webiyada Shabeelle iyo Jubba.

Iyadoo ay jiraan caqabado badan oo uu waajahayo horumarka waraabka, himilada guud ee siyaasaddan waa in ay gacan ka geysato koboca dhaqaale iyo horumarin waara si kor loogu qaado wax-soo-saarka beeraha. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa afar arimood oo mudnaanta leh, kuwaas oo ah; Horumarinta kartida hay'adaha qaybta waraabka ee heer qaran iyo heer dawlad goboleed, Dayactirka kaabayaasha waraabka ee hadda jira iyo horumarinta qorshayaal cusub ee waraab, Maaraynta iyo horumarinta waraab joogtaysan, iyo Maaraynta xogta iyo cilmi-baarista waraabka.

Waxaan aad ugu qanacsanahay in siyaasaddu ay muhiim u tahay helitaanka horumar dhaqaale iyo mid bulsho ee Soomaaliya. Sidaas darteed, Waa in dhammaan qaybaha dhaqaalaha ay qaataan kaalintooda ku aadan in ay bedelaan Soomaaliya iyagoo isku hawlaya hirgelinta Siyaasaddan.

**Xildh. Saciid Xuseen Ciid**
**Wasiirka Beeraha iyo Waraabka**
**Dawladda Federaalka Soomaaliya**

# 1. HORDHAC

## 1.1 Xaaladda Guud ee Dalka

Soomaaliya waa dal ku yaal Geeska Afrika oo ka kooban aag bedkiisu yahay 637,660 $km^2$. Soomaaliya waxay leedahay xeebta ugu dheer qaarada Afrika (3333.333 km), dhulkeeduna wuxuu ka kooban yahay dhul-hoosaad, dhul siman iyo dhul buuraley ah. Dalka ayaa dhanka waqooyiga waxaa ka xiga Gacanka Cadmeed, dhanka bari Badweynta Hindiya, dhanka koonfureed Kenya, dhanka galbeedkana Itoobiya iyo Jabuuti oo dhanka waqooyi-galbeed ka xigta. Cimilada Soomaaliya waxay inta badan u dhexeysaa oomane iyo oomane-u-eke, iyadoo celceliska heer-kulka maalintii uu yahay 27ºC. Waa kuleyl qallalan dhulka xiga Gacanka Cadmeed iyo Gobollada Gudaha ku jira, laakiin xeebta Badweynta Hindiya iyo dhulka u dhexeeya labada webi wey ka qabow yihiin. Celceliska roobabka sanadlaha ah waa 282 mm, halka Celceliska roobabka la-jeedka xeebaha waqooyiga ay yihiin 50 mm, dhulka Dooxooyinka ee gudaha dalka waa 150 mm Meesha koofur galbeed ay tahay 350-500 mm.

Xilliga roobabka dalku waa laba xilli roobaad, Guga (Abriil ilaa Juun) iyo Deyrta (Oktoobar ilaa Disembar), iyo laba xilli oo qallalan, Xagaa (Julaay ilaa Sebtembar) iyo Jilaalka (Janaayo ilaa Maarso). Dadku waxay ku tiirsan yihiin roobabka Gu'ga oo dheer iyo kuwa Deyrta oo gaaban, laakiin muhiim u ah dhanka wax-soo-saarka beeraha, dib-u-soo-fufka daaqa, biyo-keenka wabiyada, togagga, iyo kuwa dhulka ka hooseeya. Dhaqan ahaan, Guga wuxuu ahaa xilli-roobaadka ugu weyn. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jiray hoos u dhac ku yimid roobabka Guga, taasoo sharaxeysa soo noq-noqoshada abaaraha iyo daadadka ee Geeska Afrika. Isbeddellada Taariikhdu waxay muujinaysaa in abaaruhu si joogto ah u dhacaan inta u dhexeeysa 2-3 sano xilliga Deyrta iyo 8-10 sano ee xilliyada Deyrta iyo Guga isku xigta, iyada oo sii adkeysa dhibaatooyinka xilligaa. Waqtigan xaadirka ah, waxaa jira abaaro soo noq-noqonaya sababtoo ah isbedelka cimilada iyo kala duwanaashaha xilliyada.

Qaybta beeraha waa laf-dhabarka dhaqaalaha Soomaalida. Beeraha ayaa ah qaybta ugu muhiimsan ee dhaqaalaha Soomaaliya taasoo waxqabadkeedu muhiim u yahay heerka guud ee kobaca dhaqaalaha dalka (GDP). Qaybta beeraha ayaa kaalin muhiim ah ka qaadata xaqiijinta sugnaanta cuntada, shaqo abuurista, kordhinta dakhliga, iyo wixii laga helo sarrifka lacagaha qalaad. Dhab ahaan, qiyaastii 70% dadka dalka deggan waxay ku nool yihiin miyiga waxayna noloshoodu ku tiirsan tahay beeraha iyo hawlaha la xiriira. Qaybta beeraha waa furaha lagu wajaho saboolnimada iyo sugnaan la'aanta cuntada. Si loo daboolo caqabadahaas, beeraha Soomaaliya waa in laga beddelaa wax-soo-saar dhaqameedka loona beddelo wax-soo-saar casri ah oo tartan ganacsi geli kara.

Qiyaastii 3 milyan oo hektar ayaa la beeri karaa. Ku dhawaad 2.3 milyan oo hektarna dalagyadooda waxay ku baxaan ama wax ku soo saari karaan roobabka, iyadoo 700,000 hektarna wax ku soo saaraan waraabka iyadoo la adeegsanayo matoorro ama dhasheegta/daadooy labada webi ee Shabeelle iyo Jubba. Waxaa muhiim ah in la cadeeyo in ku-dhowaad saddex dalooloo laba dalool dhulka la beeri karo (roob iyo waraab), waa dhulalka carrasanka ah ee u dhexeeya labada webi ee mara gobollada koonfureed. Aag yar oo la beeran karo ayaa ku yaal gobollada Waqooyi-Galbeed iyo meelo ka mid ah ilo-biyoodka iyo xeebaha Gobollada Woqooyi Bari ayaa waxay ka kooban yihiin daloolka saddexaad ee soo haray.

### 1.2 Arar

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay xoogga saaraysaa horumarinta qayb-hoosaadka waraabka si ay si buuxda u taabageliso awoodaha nidaamka waraabka iyadoo gacan ka geysaneysa taageeridda beeraleyda si loo hagaajiyo habdhaqanada maamulka waraabka iyo horumarinta nidaamyada waraabka ee casriga ah. Sidaa daraadeed, Siyaasadda Qaran ee Waraabka (SQW) waa nuqulkii ugu horreeyay ee noociisa ah ee laga sameeyey Soomaaliya. Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ogaatay in ay lagama maarmaan tahay in la dejiyo siyaasaddan iyadoo ay ugu wacantahay qaybta waraabka oo aan nidaamsaneyn iyo isticmaalka hab-dhaqanadii hore ee waraabka iyo biyo yaraanta ba'an ee Webiyada Shabeelle iyo Jubba. Waxaa sidoo

kale jira iskuduwid la'aanta daneeyayaasha kala duwan iyo sidoo kale u doodid la’aan iyo dhaqaale wax lagu qabto oo maqan.

SQW waxay la jaanqaadaysaa rabitaanka dadka Soomaaliyeed oo ah sida ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka (2017-2019), Qorshaha Istaraatijiyadda Beeraha Qaranka (2016-2020), iyo sidoo kale istaraatijiyadaha iyo hal-abuurada gobolka iyo caalamka, sida Barnaamijka Horumarinta Beeraha Afrika ee Dhameystiran (CAADP) iyo Himilooyinka Horumarka Waara (SDGs).

Siyaasaddani waxay aqoonsan tahay qodobbada dastuurka qabyada ah iyo shuruucda kale ee dalka. Dhanka kale, siyaasaddu waxay raadineysaa in ay hagto dhammaan daneeyayaasha taasoo ku saabsan bixinta qalabka waraabka, shaqooyinka, adeegyada iyo sidoo kale waxqabadyada u sahlaya horumarinta sugnaanta cuntada, kororka nafaqada, horumairnta iyo koboca dhaqaale waara.


Qaabeynta iyo horumarinta Siyaasadda Qaran ee Waraabka ayaa waxay ku salaysan tahay muhiimada qaybta waraabka taasoo ka qayb qaadaneysa koboca dhaqan-dhaqaale iyadoo loo marayo horumarinta kartida hay'adaha.Tani waxaa lagu gaari karaa iyada oo la xoojinayo awoodda waaxyaha waraabka ee heer Qaran iyo heer Maamul-Goboleed, dayactirka kaabayaasha waraabka ee hadda jira (kanaallo, baaratooyin, buundooyin, biyo-xireeno iyo keydadka biyaha), horumarinta iyo maareynta waraab waara sida ku xusan Qorshaha Istaraatijiyada Beeraha Qaranka (2016-2020) iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka (2017-2019).

### 1.3 Taariikhda Waraabka Soomaaliya

Taariikh ahaan, wabiyada Jubba iyo Shabeelle waxaa loo isticmaali jiray waraabka beeraha yaryar ee Koonfurta Soomaaliya. Waraabin badan oo ganacsigal ah ayaa la hirgeliyay xilligii gumeysiga (1880-1960), moos la waraabiyey iyo geedo miroodkale (liinta) ayaa ahaa dalagyada ugu waaweyn. Horumarinta iyo maamulka waraabka ayaa bilowday 1920kii iyada oo la hirgelinayo Beerta Warshadda Sonkorta Jowhar iyo

dhismaha biyo-xireenada waraabka ee webiyada Shabeelle iyo Jubba, taasoo dhalisay hab wax-soo-saar cusub oo ku salaysan beeraha waaweyn ee ganacsiga iyo dhoofinta. Intii lagu jirey 1960-kii illaa iyo 1980-kii, aaggani wuxuu ahaa midka uu ku tiirsan yahay quudka dalku, iyadoo la awood siinayo, waxay si fiican u yareyn kartaa ku tiirsanaanta cuntada dibadda ee dalka. Biyaha waraabka waxaa lagu soo saaraa laba middood, in biyo-xireenada biyaha kusii daaya kanaalada waaweyn, ama matoorro biyaha ka soo jiida webiga illaa kanaalada waaweyn kuwaasoo biyaha u sii gudbiya kanaallo yar yar.

Tobanka biyo-xireeno oo ku teedsan webiyada Shabeelle iyo Jubba ayaa ah kaabayaasha waraabka ee ugu muhimsan Soomaaliya. Waxaa loo dhisay si loo kordhiyo qotoda biyaha webiga, waxayna weeciyaan qulqulka si wax loogu waraabiyo. Biyo-xireenada ayaa laga dhisay shub leh qalab farsamo iyo albaabo biro ah oo la furi karo xilliga daadadka. Qaab-dhismeedka wanaagsan ee dhulka ayaa fasaxay in biyaha waraabku ku qulqulaan shabakad kanaallo ah. Sagaal biyo-xireeno ayaa laga dhisay webiga Shabeelle, mid qurana webiga Jubba. Horumarinta waraabka ayaa si tartiib ah u ballaartay bartamihii 1970-yadii ilaa 1990-kii. Intii u dhexeysay 1980-ki iyo 1990-ki, dhulka la waraabiyey ayaa ka faa'iideystey shabakad kanaallo ah oo isku xiran iyo biyo-shuurro, taasoo saamaxeysa helitaanka biyo joogta ah oo dheeri ah iyadoo roobabka yar ee da’a aan la isku halleyn karin. Sannado badan, dhulka carrasanka ah (bacrin) iyo cimiladu waxay joogteeyeen wax-soo-saar fiican ee dalagyada loo beerto in laga helo lacago caddaan ah iyo kuwa cuntada loo beerto kuwaasoo la waraabiyay, halka la isticmaalo biyo dheeraad ah si loo xakameeyo cusbo-dhisanka beeraha.




**Jaantuska *1.1 Maabka baraha biyo-xireenada iyo qaabka waraabka labada Webi***

Gobolka Shabeellaha Dhexe wuxuu leeyahay qaab-dhismeedka waraabka iyo kaabayaasha lagu xakameeyo daadadka ee ugu habboon dalka. Waraabka tooska ah, kaasoo aan la adeegsan matoor biyaha ka soo jiida webiga, ayaa inta badan la isticmaalay; meelaha aan suurtagalka ahayn, waxaa la isticmaali jiray waraabinta matoorka. Gobolka Shabeellaha Hoose wuxuu ka mid ahaa goobaha ugu muhiimsan soo saarista dalagyada sida weyn loo dhoofiyo, sida muuska, liin balbeelmada, iyo qaraha. Kaabayaasha waaweyn ee waraabka ayaa waxaa ka mid ah todoba biyo-xireeno iyo kanaallo kala duwan oo waaweyn iyo kuwo yaryarba isugu jira, kuwaas oo fududeeya waraabka tooska ah ee dhul ballaaran oo ku teedsan dhinacyada wabiga Shabeelle. Dhinaca kale, cirifyada dhexe iyo kuwa hoose ee webiga Jubba ayaa jara dhulka carrasanka ah isagoo ku dhaafaya ciid hodan ah, taasoo gobolkan ka dhigay mid ka mid ah meelaha ugu wax-soo-saarka badan ee dalka. Waraabka matoorrada ayaa ahaa mid

caan ah. Biya-xireenka Faanoole iyo kaabayaasheeda la xiriira ayaa ahaa fududeeyaha waraabka tooska ah ee ugu weyn aagga Dooxada Jubba.

Marka loo barbardhigo kaabayaasha koonfurta Soomaaliya, kaabayaasha waraabka ee waqooyiga Soomaaliya ayaa aad u koobnaa. Horumarinta beerashada timirta ayaa ahaa hawlgal ballaaran oo ka jiray Waqooyi-Bari. Hawlaha la qabtay waxaa ka mid ahaa horumarinta kaabayaasha waraabka ee kanaalada yar yar kuwaasoo beeralayda yaryar gaarsiiya biyaha laga soo saaro ceelasha gaagaaban ama ilaha biyaha. Intaa waxaa dheer, horumarinta kawaaweynta ciidda, taasoo inta badan ay isticmaali jireen beeraleyda mesegada si loo keydiyo qoyaanka isla markaana loo joojiyo nabaad-guurka carrada, waxayna ka mid tahay waxqabadyada beeraha ee yar oo laga fuliyay Waqooyi-Galbeed.

Ka hor dagaalkii sokeeye, Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka Soomaaliya ayaa waxay ku qiyaastay in 222,950 hektar oo dhul ah in lawaraabiyay, kaasoo u kala baxda dhulka ku waraaba matoorro iyo dhulka ku waraaba daadadka ku soo fatahma. Xilligii dagaalkii sokeeye ee sanadkii 1991[kii] waxaa jiray sagaal biyo-xireeno oo shaqeynayay kuna teedsanaa Webiga Shabeelle iyo mid ku yiilay webiga Jubba. Soomaaliya waxay lahaan jirtay qaab-waraabeed ballaaran iyo xakameynta daadadka, kuwaas oo ka kooban biyo-xireeno, kanaallo iyo kaabayaal kale oo ku yaalla cirifyada dhexe iyo kuwa hoose ee webiyada Jubba iyo Shabeelle. Sanadkii 1984ki, aagga loogu talagalay waraabinta waxay ahayd 200,000 ha, taas oo 50,000ha oo ka mid ah ay ahayd waraab toos ah oo dhamaystiran halka 150,000ha ay ahayd waraabka daadadka. Si kastaba ha ahaatee, inta badan kaabayaasha waraabka ayaa burburay taas oo sababtay in wax-soo-saarka beeraha hoos u dhaco. Kaabayaashasoo haray, inta badan lama isticmaalo dayactir la'aan, taasoo keentay in goobihii la waraabin jiray hadda loo isticmaalo roob-ku-bax iyo daaqa xoolaha.

## 1.4 Caqabadaha Qaybta Waraabka

Caqabadaha soo socda ayaa la caddeeyay iney yihiin kuwa ugu muhiimsan ee hor taagan waraabka Soomaaliya:

- Horumarinta kartida hay'adeed oo liidata ha ahaato heer Qaranka amd heer Dawlad Goboleed, taas oo ay wehliso taagdarrada iyo/ama maqnaanshaha nidaamyada waraabka, xeerarka, siyaasadda, iyo fulinta sharciga.

- Isticmaalka biyaha waraabka oo xad-dhaaf ah iyadoo la raacayo habka waraab dhaqameedka daadka ah taas oo ah arrin caadi ka ah Soomaaliya. Tani waxay keenaysaa biyo badan iney khasaaraan, sidaa awgeedna wabiguba qallalo.

- Waxaa jira iska-hor-imaad joogto ah oo u dhexeeya beeralayda qeybta sare iyo qeybta hoose ee webiyada. Khilaafkan badanaa waxaa sabab u ah xeerarkii iyo maamulkii isticmaalka biyaha oo maqan.

- Inta badan kanaalada waraabka ayaa si xun carro uga buuxsantay, cawsna ka baxay, taas oo keentay inay shaqeyn karaan oo kaliya marka webigu buuxo, sidaas daraadeed, waxaa si aad ah u yaraaday dhulka dalagyada la waraabiyo ka baxaan.

- Biyaha oo yaraada ayaa sidoo kale keena iska-hor-imaad marka beeralayda qaar ay xannibaan kanaalka iyo webiga oo docfaruur lagu sameeyo, sidaas daraadeedna beeralayda sii hooseeya biya la’aan badani ku dhacdo.

- Xilligan la joogo, qayb yar oo ka mid ah meelaha ugu suurogalka badan in wax lagu beerto ee ku yaalla jiinka webiyada Juba iyo Shabeelle ayaa loo isticmaalaa wax-soo-saarka beeraha. Sidaa awgeed, waxaa jira awood weyn oo aaggaa lagu ballaarin karo laguna horumarin karo. Siyaasaddu waxay ku talo jirtaa inay taageerto socdaalka beeralayda min beerashada quudka ilaa beerasho ganacsi-gal ah.

- Isticmaalka farsamooyinka waraab-dhaqameedka halkii loo gudbilahaa tiknoolojiyada casriga ah ee waraabka Soomaaliya ayaa waxay keentay in biyo badan la isticmaalo iyadoo aan la tixgelinayn baahida biyaha ee dalagga.

- Waxaan jirin barnaamijyada dayactirka jiinka iyo carra-tuurka webiyada laga soo bilaabo 1991[kii], taas oo keentay fatahaado iyo abaaro soo noqnoqda.

- Kanaalada waaweyn iyo kuwa yaryar ee waraabka oo carro buuxisay.

- Waxaan jirin biyo-xireeno si buuxda u shaqeynaya oo ku teedsan webiyada Shabeelle iyo Jubba.

- Maqnaanshaha Guddiyada Waraabka heer Qaran, heer Dawlad Goboleed, iyo heer Bulshaba.

- Maqnaanshaha maamul u gaar ah webiyada Shabeelle iyo Jubba.

- Waxaan jirin maareyn waxtar leh ee kheyraadka biyaha beeraha.

- Isku-duwidda barnaamijyada waraabka, maarayn joogto ah iyo horumarinta waraabka oo liidata.

- Maaraynta biyaha ee qaybta waraabka oo liidata.

- Biyo yaraanta iyo amni-darrada.

- Ceelasha gaagaaban iyo kuwa dhaadheer oo liita.

- waxaa jira xilliga roobka biyo badan oo khasaara oo aan laga faa'ideysan.

- Waa muhiim in sahan la sameeyo ka hor inta aan ceelasha la qodin. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la ogaado helitaanka biyaha dhulka ka hooseeya.

- Biya-qabatinka oo liita gaar ahaan biyaha togagga.

- Maareynta biyaha iyo hababka kaydka biyaha ee qaybta waraabka oo liita.

- Isticmaalka tiknooloojiyada oo xaddidan sida isticmaalka tamarta qorraxda si loo yareeyo qiimaha shidaalka.

- Waxaan jirin dayactirka kaabayaasha waraabka sida ceelasha, waraha iyo horooyinka kaydka.

- Waxaan jirin maalgelin wax ku ool ah oo loo qoondeeyay qaybta waraabka.

- Ceelal badan oo laga qoday waadiyada iyo togaga agtooda ayaa fatahaado burburiyeen taas oo keentay in laga guuro. Si dadka deegaanka ee leh waayo-aragnimada beeraha ay dib u soo nooleeyaan beerashada, dayactirka ceelasha hadda jira ayaa leh mudnaanta kowaad, waxaana loo baahan yahay in si degdeg ah loo hirgeliyo.

- Nidaamka waraabka ee loo adeegsanayo ceelasha dhaadheer ee la isticmaalo matoorro ayaa qiimaha shidaalku aad u sareeyaa, waxaana badanaa waxyeeleeya fatahaadaha.

- Caqabadda ugu weyn ee nidaamka waraabka ee la isticmaalo biyaha dhulka dushiisa qulqula ayaa ah xasillooni la’aanta biyaha loo qoondeeyay ee ku jira balliyada ama berkedaha.

- Si loo yareeyo isticmaalka biyaha beeraha iyo maaraynta khayraadka biyaha si karti iyo wax-ku-ool ah, waxaa muhiim ah in la hirgeliyo horumarinta farsamooyinka waraabka iyo sidoo kale xulashada dalagyada ku habboon.

- Waxaan jirin kaabayaal waraab oo ballaaran sida biyo-xireenno, biyo-weeciyeyaal iyo ceelal.

- Kaabayaasha heer bulsho oo liita, sida berkedaha, ceelal-gacmeedka, balliyada iyo tiknoolojiyada kale, si loo hubiyo in uu jiro habab dayactir oo joogto ah.

- Waxaan jirin carra tuurka jiinka wabiyada ama biyo-xireenno la sameeyo, si loo ilaaliyo aagag fatahaadaha u nugul.

**1.5 Fursadaha qaybta waraabka ee Soomaaliya**

Beeraha Soomaaliya waa hawl dhaqaale oo muhiim ah, uma aha keliya marka la eego baahida cunto ee dadka, laakiin sidoo kale waxay muhim u yihiin dakhliga laga helo iibka dalagyada beeraha iyo weliba fursado shaqo oo badan. Qiyaastii 50% baahida dadwaynaha ee badarka la quuto ayaa laga helaa wax-soo-saarka gudaha.

Iyadoo ay jirto in qiyaastii 8.1 milyan oo hektar oo ah dhul carrasan ah oo ku teedsan wabiyada Shabeelle iyo Jubba iyo gobollada ku hareeraysan, beerashadu ma lahan oo keliya awood ay ku dabooli karto baahida cunto ee gudaha, haseyeeshe waxay sidoo kale kaalin muhiim ah ka ciyaari kartaa suuq-geynta dibadda. Intaa waxaa dheer, malaayiin qof ayaa hab-nololeedkoodu ku tiirsan yahay wax-soo-saarka beeraha. Inta badan dadkaasi waa beeralayda yaryar oo ka hawlgala goobaha roobabka ku baxa. Beeraha ganacsi ee yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah ee la waraabiyo oo ku yaalla jiinka labada webi ee Shabeelle iyo Jubba, ayaa sidoo kale kaalin muhiim ah ka qaata buuxinta meelaha maran ee cunto la'aanta iyo sidoo kale wax ku biirinta dhaqaalaha qaranka. Beeraleydani waxay soo saaraan dalagyo ganacsi sida muuska, sisinta, liinta,

bambeelmada, cambaha, babaay (mafafay), khudaar kale iyo miraha loogu talagalay gudaha iyo suuqyada caalamiga ah.

Dhulalka qallalan, badanaa beeraha la waraabiyo ayaa waxay ku teedsanyihiin durdur xilliyeedka. Biyaha waxaa si toos ah looga soo saaraa ilaha iyo/ama ceelal-gacmeedyada laga dhisay meel u dhow durdurrada iyo dooxooyinka hoostooda. Waxay sidoo kale inta badan ku tiirsan yihiin soo saarista biyaha dhulka, keydinta biyaha roobabka iyo farsamooyin lagu qabto qoyaanka hawada. Abaarihii dhowaa waxay saameeyeen qaybo badan oo ka mid ah goobahaas. Beeralayda dalka ee badi goboladan, ayaa horay ugu dhaqmay waraabka baaxadda yar ee dusha dhulka iyo wax ku beerashada ilo-biyoodka ku ag-yaal dhinacyada webiyada qallalan ama meelaha ku dhow, iyada oo la isticmaalayo biyaha ceelal-gacmeedka iyo mararka qaarkood iyadoo la xaddidayo socodka biyaha webiga qaybtiisa hoose si loogu weeciyo faraha beeraha. Beerahaani waxay inta badan furutada iyo khudaarta u soo saaraan tuulooyinka deriska ah iyo magaalooyinka. Maadaama dhul-beereedka laga aasaasay meelaha laga heli karo biyaha waraabka, badanaa beerahu waxay ku teedsan yihiin jiinka waadiyada (togogga). Beeraha ay sameystaan shakhsiyaadka gaarka ahi waa kuwo yaryar oo ilaha biyaha waraabka ka hela ceelal-gacmeedyo.

Biyaha dhow ee dhulka hoostiisa ayaa badanaa laga soo nuugaa ceelal-gacmeed laga qodey waadiyo/togag qotadoodu gaarayso 5-7 mitir. Isbeddel-xilliyeedka ee dhererka iyo mugga biyahu ma weyna marka laga reebo abaaro is xigxiga oo aad u daran. Sidaa darteed, isticmaalka joogtada ah ee biyaha waraabka loogu talagalay waa suurtagal. Ceelal-gacmeedyo badan oo waadiyada agtooda laga qoday ayaa fatahaado burburiyeen taas oo keentay in laga guuro. Si dadka deegaanka ee leh waayo-aragnimada beeraha, si ay dib u soo nooleeyaan beerahashada, dayactirka ceelasha hadda jira ayaa leh mudnaanta kowaad, waxaana loo baahan yahay in si degdeg ah loo hirgeliyo.

## 1.6 Sababta Siyaasadda Waraabka

Soomaaliya, qiyaastii 3 milyan oo hektar ayaa la beeri karaa. Ku dhowaad 2.3 milyan oo hektar dalagyadoodu waxay ku baxaan ama wax ku soo saari karaan roobabka, iyadoo 700,000 oo hektarna wax ku soo saaraan waraabka iyadoo la adeegsanayo biyaha dhulka hoostiisa ama kuwa labada webi ee Shabeelle iyo Jubba. Ilaha biyaha ee ka imaanaya labada webi waxay abuuraan shaqooyin, koboc dhaqaale, iyo hab-nololeedka kumannaan beeraley yaryar iyo kuwo leh beero ganacsi. Iyada oo ay jirto biyo yaraanta xilliga jiilaalka, wabiyadu waxay noqdaan isha keenta iskudhaca u dhaxeeya beeralayda iyo xoola-dhaqatada oo u socdaala masaafo dheer iyagoo raadinaya biyo ay siiyaan xoolahooda.

Sugnaan la’aanta cunto waa caqabadda ugu culus ee soo foodsaarta dalka. Waxaa jira sababo badan, oo ay ka mid yihiin burburinta kaabayaasha waraabka sida kanaallada waaweyn, biyo-xireenada iyo baliyada waaweyn ee lagu kaydiyo biyaha oo ku teedsan wabiyada. Si loo wajaho dhibaatada helitaanka biyaha, in ka badan 99% biyaha guud ee Soomaaliya ayaa loo adeegsadaa ujeedooyinka waraabka iyadoo culayska ugu weyn uu iminka saaranyahay webiyada iyo ilaha biyaha dhulka hoostiisa mara.

## 2. SIYAASADDA IYO ISTIRAATIJIYADDA QARAN EE WARAABKA

### 2.1 Yoolka Siyaasadda

Qaybta waraabka oo ah mid joogto ah, firfircoon, waxtar leh, baahida ka tarjumeysa, kuna shaqeyneysa awoodda isbeddelka ee horumarinta iyo kala duwanaanta beeraha, si loo abuuro hanti qaran iyo sugnaan cunto.

### 2.2 Howlgalka Siyaasadda

Siyaasadda Qaranka ee Waraabku waxay bixineysaa qaab guud oo u horseedaysa koboca dhaqaalaha ee qaybta beeraha iyadoo loo marayo nidaam qaran oo shaqeynaya, hawl-qabadkiisuna heer sare yahay.

### 2.3 Himilada iyo Ujeedada Siyaasadda

#### 2.3.1 Himilooyinka Siyaasadda

Himilada guud ee Siyaasadda Qaran ee Waraabku waa in uu gacan ka geysto kobcinta dhaqaalaha qaranka iyo horumarka iyada oo la marayo kordhinta wax-soo-saarka beeraha la waraabiyo.

#### 2.3.2 Ujeeddooyinka Siyaasadda

Ujeeddada Siyaasadani waa joogteynta hababka wax-qabad ee ugu wanaagsan iyadoo lala xiriirinayo is-bedello la gaari karo, taasoo Soomaaliya u horseedi doonta inay dhaqaale ahaan guulaysato. Ujeeddooyinka Siyaasadda Qaran ee Waraabka ayaa diiradda saaraya:

- Xoojinta iyo hagaajinta awoodda hay'adaha iyo mu'asasaadka
- Horumarinta iyo dib u habaynta hawlaha waraabka ee dalka

- Dib u habayn joogta ah oo asaasi doonta halbeegyada iyo xeerarka qaranka
- Kor u qaadista isticmaalka biyo ku filan bulshooyinka iyadoo loo marayo waxbarashada iyo tababarka, gaar ahaan dumarka iyo dadka u nugul faqriga
- Kordhinta isticmaalka tiknooloojiyadaha leh waxtar iyo kharash ku habboon ee yaraynta isticmaalka biyaha
- Helidda xog iyo ka qaybgalka dib u habaynta waraabka ee dadka isticmaala biyaha
- Koboca fursadaha ee qaybaha waraabka oo loogu tala galay ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo bulshooyinka
- Horumarinta waxtarka isticmaalka biyaha iyada oo loo marayo xoojinta hababka maaraynta biyaha ee soo jireenka ah
- Dayactirka qalabka waraabka
- Qorshayaasha maaraynta biyaha inta lagu jiro dhacdooyinka cimilada daran
- Horumarinta togagga (waadiyada) loo isticmaalo ujeedooyinka waraabka
- Horumarinta ilaha biyaha dhulka hoostiisa ee loo isticmaalo biyaha waraabka ee joogtaysan

## 2.4 Natiijooyinka Siyaasadda

Natiijooyinka siyaasadda waa:

- Awoodda hay’adeed ee qaybta waraabka ee Soomaaliya oo la xoojiyey
- Wax-soo-saarka beeraha ku baxa waraabka oo kordhay

- Maaraynta biyaha waraabka oo la hagaajiyey iyadoo la raacayo tiknoolojiyadda waraabka oo casri ah waxtarna u leh maaraynta iyo isticmaalka biyaha oo lagu xoojiyey xeerarka

- Gudbinta adeegga waraabka oo lahormariyay iyo fursadaha shaqo oo kordhay

- Suuqnaanta biyaha ee webiyada Juba iyo Shabeele oo hagaagay iyada oo loo marayo maaraynta iyo horumarka waraabka

- Isku dhacyada iyo khilaafaadka la xiriira qaybta waraabka oo hoos u dhacay

- Togagga (waadiyada) loo isticmaalo waraabka oo la hormariyey

- Biyaha dhulka hoostiisa oo loo isticmaalo biyaha waraabka oo joogtaysan oo kordhay

**2.5 Waxyaalaha Mudnaanta u leh Siyaasadda iyo Meelaha Bartilmaameedka ah**

Si loo gaaro himilada guud, siyaasaddu waxay xoogga saaraysaa afartan arimood ee mudnaanta leh: 1. Horumarinta kartida hay'adaha qaybta waraabka ee heer qaran iyo heer dawlad goboleed, 2. Dayactirka kaabayaasha waraabka ee hadda jira iyo horumarinta qorshayaal cusub ee waraab, 3. Maaraynta iyo horumarinta waraab joogtaysan, iyo 4. Maaraynta xogta iyo cilmi-baarista waraabka.

**2.5.1 Horumarinta Awoodda Hay'adaha**

Horumarinta iyo maaraynta hababka waraabka waxay u baahantahay awood ku filan ee farsamo, maamul iyo dhaqaale. Kartida farsamo ee ka dhexjirta qaybaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay oo ay ku jiraan hay'adaha wax tababara iyo bulshooyinka ka-faa'iideystayaasha ah ayeey muhiim u tahay horumarinta iyo maaraynta waraab joogtaysan.

Caqabadaha ugu waawayn ee haysta awoodda hay'adaha waraabka waxaa ka mid ah:

- Waxaan jirin qorshe weyn ee waraabka, sharciga waraabka iyo qorshe istiraatiijiyadeed ee waraabka

- Qalabka waraabka iyo baahiyaha tababarka ee daneeyayaasha waraabka oo aan diiwaan gashanayn

- Halbeegyada waraabka qaranka, xeerka shaqada iyo tilmaamaha horumarinta waraabka oo aan jirin

- Waxaan jirin khibrad ku filan waraabka

- Waxaan jirin xarumo/mu'asasaad cilmi-baaris ee waraabka iyo adeegyada fidinta

- Waxaan jirin qalabka culus ee waraabka iyo caratuurka webiga

- Bixiyayaasha adeegga waraabka oo aan ku filnayn

Xukun abaabulan ayaa loo baahanyahay si loo gaaro horumarka iyo koboca qaybta waraabka. Waa in Dawladda Federaalku xoojisaa dhisidda awoodda, buuxisaana waxyaalaha ka maqan adeegyada ay bixiyaan qaybaha gaarka loo leeyahay, shaqaalaha bulshada, deeq bixiyayaasha iyo kuwa kale. Awoodda dhammaan dhinacyada ay khuseyso waa in la sii horumariyaa iyada oo la raacayo hindisiyaasha u dhaxeeya dawladaha federaalka, dawlad goboleedyada iyo dawladaha hoose oo kaashanaya isticmaalayaasha biyaha waraabka.

#### *2.5.1.1 Ujeedada Istiraatiijiyadeed ee Siyaasadda*

Waa in la horumariyo tababaro nidaamsan, la hagaajiyo kartida farsamo ee qaybaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, oo ay ku jiraan hay'adaha tababarka iyo

bulshooyinka ka-faa'iideystayaasha, iyo in la helo qalab culus ee waraabka iyo caratuurka webiyada.

### *2.5.1.2 Qoraalada Siyaasadda*

Sidaas darteed siyaasaddu waxay:

- Horamarin doontaa, hirgelina doontaa qorshaha weyn ee waraabka iyadoo loo marayo ka qaybgelinta iyo baahiyaha bulshada.

- Horumarin doontaa korna u qaadi doontaa barnaamijyo tababar (oo ay ka mid tahay tababarka shaqada) si wax looga qabto daldaloolada ka dhexjira hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyadoo loo marayo tababaridda hay’adahaas.

- Horamarin doontaa halbeegyada waraabka, xeerka shaqada iyo tilmaamaha horumarinta waraabka, iyo sidoo kale hubin doonta in dhammaan daneeyayaasha waraabku ay u hogaansamaan arimahan.

- Hubin doontaa in ay si weyn u joogaan khubarada waraabka ee heer qaran, heer dawlad goboleed, heer degmo iyo heer tuulo.

- Horumarin doontaa, qaadanna doontaa tiknooloojiyadaha iyo dhaqamada fiican ee waraabka, iyada oo la tixgelinayo xadidaadaha dhaqaale iyo farsamo ee haysta ka-faa’iidaystayaasha, iyo in ay faafindoonto iyada oo loo marayo nidaam adag oo fidin ah.

- Dhiirigelin doontaa daneeyayaasha waraabka si loo helo qalabka lagama maarmaanka ah iyo farsamooyinka waraabka.

- Dhiirigelin doontaa diiwaan gelinta bixiyayaasha adeegga waraabka (sida: la-taliyayaasha iyo qandaraaslayaasha) oo ay weheliyaan hay'ado mihnad la xiriirta leh.

- Fududayn doontaa barnaamijyada tababarka beeraleyda si loo bedelo caqliyadda beeralayda ee isticmaalaya hababka waraabka ee soo jireenka ah oo loo bedelo isticmaalka farsamada casriga ah, iyo in laga wareego waraabka nolol maalmeedka oo loo wareego waraabka ganacsiga.

- Asaasi doontaa Guddi Qaran ee Waraabka, kaas oo lagu dhisi doono iskaashiga maamulka iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay (PPP) oo lagu darayo dhammaan dadka isticmaala biyaha waraabka.

- Horumarin doonta, sidoo kale kor u qaadi doonta barnaamijyada tababarka ee hadda jira iyadoo xoogga la saarayo in la bartilmaameedsado qaybaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

- Ballaarin doontaa kartida farsamadeed ee shaqaalaha dawladda ee qorshaynta, naqshadeynta, kormeerka, iyo qiimeynta dhammaan dhinacyada qaybaha waraabka.

- Suurtagelin doontaa in si fudud loo gaaro xogta qaranka ee qorshaysan ee isticmaalka biyaha ee qaybta waraabka.

- Abuuri doontaa xeer shaqo iyo tilmaamo midaysan ee qaranka si loo xoojiyo dib-u-habaynta waraabka.

- Dhiirigelin doontaa xiriirka shaqada ee ka dhexeeya khuburada waraabka iyo beeralayda iyadoo xooga la saarayo faafinta macluumaadka muhiimka u ah sida hababka joogtaynta.

- Ballaarin doontaa, xoojinna doontaa kaalinta hay'adaha dawladda ee ka shaqeeya horumarinta iyo kobcinta qaybta waraabka.

- Asaasi doontaa ururada isticmaalayaasha biyaha waraabka ee dhammaan bulshada iyadoo fiiro gaar ah loo yeelanayo beeralayda yaryar.

- Iskuduwi doontaa wada-xaajoodka ka dhexeeya ururada, gaar ahaan kooxaha kala deggan webiga qaybtiisa kore iyo tan hoose, iyo sidoo kale beeralayda iyo xoola-dhaqatada.

- Ka qayb gelin doontaa dhammaan daneeyayaasha, oo ay ka mid yihiin wakiilada kooxaha isticmaalayaasha, wada-hadallada iyo go’aanada dib-u-habeeynta siyaasadda ay la geli doonaan wakiilada dawladda.

### 2.5.2 Dayactirka Kaabayaasha Waraabka ee Hadda Jira iyo Horumarinta Qorshayaal Cusub ee Waraab

Tan iyo burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya, in ka badan kala bar kaabayaashii waraabka waxay noqdeen kuwo aan shaqaynayn taas oo ay uga wacantahay burburka nidaamkii waraabka, oo ay ku jiraan kanaalada, biya xireenada, buundooyinka, iyo baaratooyinka. Inta badan kanaalada waraabka ayaa si xun u buuxiyeen una xireen ciid iyo dhir taas oo keentay in ay shaqeeyaan oo kiliya markii uu webigu soo buux dhaafo, taas oo si weyn u yaraysay aagga dalagyada waraaba. Natiijada kale oo keentay in nidaamka kanaalada uusan shaqaynin waa beeralayda oo jebiya qararka webbiyada si ay u helaan biyo waraab, taas oo keentay daadad aan la xakamayn iyo biyaha oo khasaara. Dalagyada ku waraaba qaabkan waxay u badanyihiin in aysan helin biyaha waraabka labaad. Biyo yaraantu waxay sidoo kale keentaa iskahorimaadka marka beeralaydu xirto kanaalada, sidoo kalena ay jebiyaan qararka webiyada arimo waraab awgeed, sidaas darteedna biyo la’aani ku dhacdo beeralayda degan dhinaca hoose ee webiga. Dayactirka kanaalada, wax ka bedelka qaab dhismeedka iyo biyo-shubyada ayaa ah kuwo aad muhiim u ah.

Kaabayaasha waraabka ee Soomaaliya waxay u baahan yihiin dayactir guud. Intii ka horreysay dagaalkii sokeeye, waxaa lagu qiyaasay in awoodda waraabku ay ahayd qiyaastii 240,000 oo hektar. Si kastaba ha ahaatee, kiliya 65,000 oo hektar oo dhul beereed ah ayaa hadda la beertaa.

### *2.5.2.1 Ujeedada Istiraatiijiyadeed ee Siyaasadda*

Si loo dayactirka kaabayaasha/mashaariicda waraabka ee hadda jira, ay ka mid tahay kanaalada, biyaxireenada, baaratooyinka iyo balliyada kaydka, si kor loogu qaado wax-soo-saarka beeraha iyo in la yareeyo abaaraha iyo fatahaadaha ku soo noqnoqday Soomaaliya.

### *2.5.2.2 Qoraalada Siyaasadda*

i. In la caddeeyo lana cusboonaysiiyo waxyaalaha loogu baahanyahay dayactirka dhammaan mashaariicda waaweyn iyadoo la isticmaalayo hab xog ururin midaysan.

ii. In dib loo soo celiyo qaabdhismeedyadii marxalada kala duwan iyadoo diirada la saarayo meelaha ugu dhibta badan.

iii. In isticmaalayaasha biyaha waraabka iyo hay'adaha ay khusayso laga qayb galiyo dadaalada dayactirka iyo helidda tababarada loogu baahanayahay hawlgalka iyo dayactirka kaabayaasha.

iv. In la baro hay'adaha isticmaala biyaha waraabka cawaaqibka ka dhalan kara xaaladaha xun ee daagaanka ee ku dhici kara qaabdhismeedka waraabka.

v. In la dayactiro kaabayaasha waraabka ee mudnaanta leh sida kanaalada, baaratooyinka, biyaxireenada, iyo balliyada kaydka si loo soo celiyo shaqadii kanaanalada iyo xaaladdoodii hore si loo hormariyo loona ballaariyo

kaabayaasha guud ee waraabka iyo si loo kordhiyo wax-soo-saarka dalagyada haddeey noqon lahayd wax-soo-saarka nolol maalmeedka ama mid ganacsi.

vi. In la taageero lana dhiiri geliyo abaabulidda khayraadka maaliyadeed ee loogu talagalay dayactirka kaabayaasha waraabka iyo in la fududeeyo asaasidda iyo hirgelinta sanduuqa waraabka si loo maalgaliyo mashaariicda waraabka.

vii. In la hormariyo maareynta iyo maamulka waxtarka leh iyo nidaamka isticmaalka khayraadka biyaha ee beeraha.

viii. In la taageero lana dhiiri geliyo dhaqangelinta qiimaynta bulshadeed iyo midda deegaaneed ee ay ku saamaynayso dayactirka kaabayaasha waraabka.

ix. In la taageero lana dhiiri geliyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, ururada bulshada rayidka ah, iyo sidoo kale ka-faa'iidaystayaasha sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen qaybta waraabka.

### 2.5.3 Horumarinta waraab joogtaysan

Horumarinta waraabka ee joogtaysan ayaa ah in la dhiso kaabayaal cusub si loo badiyo dhulka waraabka. Aagagga la waraabiyo ayaa si joogta ah hoos ugu dhacayey tan iyo markii burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya sanadkii 1991[kii].

Horumarinta waraabka ayaa ka yaraa heerkii la rabay oo ay ugu wacantahay dhowr arrimood, oo ay ka mid tahay in aysan jirin abaabulka khayraadka maaliyadeed, hawlaha horumarinta waraabka oo aan isku mid ahayn, hoos u dhac ku yimid dhulka iyo deegaanka, iyo ka qayb qaadashada daneeyayaasha oo xadidan.

Waqtiga hadda la joogo, isticmaalka biyaha waraabka ayaa hoos u dhacay marka loo barbardhigo ka hor dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya. Daadadka, oo ah hab soo jireen

ah oo dalagyada lagu waraabin jiray, ayaa keentay in la helo wax-soo-saar yar iyo khasaaro ku yimaada dalagyada.

### *2.5.3.1 Ujeedada Istiraatiijiyadeed ee Siyaasadda*

In la hormariyo kaabayaal badan oo waraab ah iyo in la siyaadiyo dhulka waraabka si loo gaaro horumar joogtaysan ee dhinaca waraabka ah iyo in la abuuro unugga abaabulka khayraadka maaliyadeed.

### *2.5.3.2 Qoraalada Siyaasadda*

i. In la soo bandhigo lana tijaabiyo habab fudud oo saamayn yar sida waraabka dhibcaha oo lagu tijaabiyo qaybo kala duwan.

ii. In kor loo qaado isticmaal isku dhafan ee biyaha dhulka, biyaha roobka iyo biyaha la daaweeyey iyada oo loo marayo siminaaro waxbarasho.

iii. In la baaro hababka kaydka biyaha oo leh waxtar lana dhaqan gelin karo sida moosaska macmalka iyo xilli roobaadka.

iv. In la isticmaalo goobo bandhig marka ay lagama maarmaanka tahay in la tuso isticmaalayaasha biyaha waraabka habab iyo farsamooyin waxtar leh.

v. In la taageero lana dhiiri geliyo abaabulka khayraadka maaliyadeed ee maaraynta iyo horumarinta waraabka.

vi. In la fududeeyo asaasidda Guddiga Waraabka ee Qaranka Soomaaliyeed, kaas oo kala talin doona dawladda iyo daneeyayaasha arimaha siyaasadda ee la xiriira waraabka iyo biyo-shubyada.

vii. In la fududeeyo asaasidda iyo hirgelinta sanduuqa waraabka si loo maalgeliyo mashaariicda horumarinta waraabka.

viii. In la taageero fulinta Qorshayaasha waxqabadka waraabka ee ku xusan Qorshaha Horumarinta Qaranka iyo Qorshaha Istaraatiijiyadeed ee Beeraha Qaranka.

ix. In la taageero lana dhiiri geliyo dhaqangelinta qiimaynta lagu samaynayo saamaynta deegaaneed iyo midda bulshadeed, iyo fulinta qorshayaasha maaraynta deegaanka.

x. In la taageero lana dhiirigeliyo qaybaha gaarka loo leeyahay, Ururada Bulshada Rayidka ah iyo ka-faa'iideystayaasha in ay ka qayb galaan horumarinta waraabka iyada oo loo marayo bixinta taageerada horumarinta waraabka iyo adeegyada fidinta gaar ahaan dhinacaya ay ka mid tahay daraasadaha suurtagalnimada, naqshadda, iyo dhismaha.

xi. In la fududeeyo horumarinta kheyraadka biyaha si loo xoojiyo helitaanka biyaha inta lagu jiro xilliga waraabka.

### 2.5.4 Maaraynta waraab joogtaysan

Waxaa saameeyey maareynta mashaariicda waraabka caqabado dhowr ah oo ay ka mid yihiin dayactir la'aanta nidaamka waraabka ee webiyada Shabeelle iyo Juba, taas oo saameeysay helitaanka kheyraadka biyaha, rabitaan la’aanta bushada ka-faa’iidaystayaasha ama kartida oo xadidan si ay nidaamyadu u shaqeeyaan loona dayactiro, caqabadaha waraabka, arimaha lahaanshaha dhulka, iyo adeegyada fidinta waraabka oo aan jirin, taas oo keenaysa inuu khasaare ku yimaado kartida nidaamyada.

Waa in si fiican loo maareeyaa aagagga ku hormaray mashaariicda waraabka si loo xoojiyo wax-soo-saarka. Waa in bulshada ka-faa’iidaystayaasha ka shaqeeyaan

xoojiyaanna kaabayaasha si awoodaha la qorsheeyey loo sii wado taageeridda heerarka wax-soo-saarka dalagyada la doonayo.

### *2.5.4.1 Ujeedada Istiraatiijiyadeed ee Siyaasadda*

In la horumariyo maareynta waraab joogtaysan oo ka hortagi kara burburka dhulka iyo deegaanka iyada oo loo marayo maaraynta biyaha wabiga, taas oo kordhin doonta helitaanka khayraadka biyaha. In bulshada ka-faa'iidaystayaasha ay ilaashaan kaabayaasha si loo xoojiyo awoodaha la qorsheeyey, taa oo keeni doonta taageeridda heerarka wax-soo-saarka dalagyada la doonayo iyo xoojinta adeegyada fidinta ee waraabka.

### *2.5.4.2 Qoraalada Siyaasadda*

Sidaas darteed siyaasaddu waxay:

i) Dhiiri gelisaa asaasidda maamul xakuma biyaha webiga iyo in kor loo qaado dhaqangelinta maaraynta biyo-dhacyada si ay uga faa'iidaystaan bulshooyinka waraabka wax ku beerta iyo kuwa aan wax ku beeran.

ii) xoojinaysaa ururada beeraleyda iyada oo loo marayo aqoon farsamo iyo mid maamuleed si loo hubiyo ka qaybqaadashada bulshada oo wax ku ool ah.

iii) Asaasi doontaa guddiga waraabka ee heer tuulo iyo ururka isticmaalayaasha biyaha si loo gaaro isticmaal iyo maamul waxtar leh ee biyaha waraabka.

iv) Raadin doontaa wax bedeli kara suuq gaynta wax-soo-saarka beeralayda si loo gaaro faa'iidada ugu sareeysa ee dalagyada waraabka ku baxa.

v) Xoojin doonta adeegyada fidinta beeraha waraabka ku baxa iyadoo loo marayo wacyi gelinta iyo gaarsiinta farsamooyinka waraabka.

vi) Taageeri doontaa bulshooyinka ka-faa’iidaystayaasha iyadoo loo baahanyahay dayactir weyn oo loo marayo casriyaynta iyo cusboonaysiinta kaabayaasha waraabka.

**2.5.5 Maaraynta xogta iyo cilmi-baarista waraabka**

In kastoo muhiimiyadda beeraha waraabka ku baxa oo aad looga shaqeeyey ay u leeyihiin wax-soo-saarka dalagyada iyo faa’iidada, hadana, waxqabad ku habboon oo uu ka mid yahay cilmi-baarista ama tijaabada weli lagama hirgelin meelahaas. Ma jirto cilmi baaris ama tijaabo ballaaraan oo lagu sameeyo qaybta waraabka si loo xaqiijiyo in la helo qorshe habboon, naqshad, horumarin, maarayn, hawlgal, iyo dayactirka mashaariicda waraabka. Sidaas awgeed, waxaa jira talooyin xoogaa ah oo ku habboon isku dhafka biyaha iyo khayraadka kale oo khuseeya beeraha waraabka ku baxa.

Marka la fiirsho khubarada tijaabada waraabka oo yar, dhaqaale la’aan jirta, iyo qalab iyo xarumo ku habboon tijaabada waraabka oo aan jirin, waxay keentay in hawlaha cilmi-baarista ama tijaabada ee ay sameeyaan hay'adaha dalka aysan si ku filan uga qaban arrimaha waraabka. Hawlaha cilmi-baarista ee la qaban jiray ka hor intaanay burburin dawladdii dhexe ee sannadkii 1991[kii] ma awoodi karin in ay bixiso taageerada farsamo ee loo baahnaa si loo hormariyo wax-soo-saarka iyo faa’iidada. Iyada oo gacan laga helayo hay'adaha iyo mu’asasaadka caalamiga ah, xogta iyo macluumaadka la xiriirta tirakoobyada waraabka ee Soomaaliya waa mid isbeddela.

Abuurista nidaamka maaraynta macluumaadka waraabka ayaa muhiim u ah Soomaaliya. Ujeedada shaqadu waa in la sameeyo nidaamka macluumaadka waraabka ee wadanka oo dhan. Nidaamku wuxuu isku daraa macluumaadka jira iyo kuwa la heli karo oo ku saabsan Soomaaliya, isaga oo diiradda saaraya dooxooyinka labada webi oo ah meelaha beeraha ugu muhiimsan. Inkasta oo aysan jirin xogo faahfaahsan, hadana nidaamka macluumaadka waraabka ee hadda jira waxaa loo tixgelin karaa dadaalka koowaad ee lagu dhisayo qalab waxtar leh oo lagu xakamaynayo, qorsheynayo, maareeynayo, laguna kormeerayo dhulka. Aragtidaas, hawlaha ugu muhiimsan ee shaqada waxay ururinayaan

dhammaan macluumaadka jira iyo kuwa la heli karo ee Soomaaliya waxayna si adag u qiimeeyaan faa'iidada macluumaadkaan marka la eego nidaamka mustaqbalka.

#### *2.5.5.1 Ujeedada Istiraatiijiyadeed ee Siyaasadda*

In la hirgeliyo lana xoojiyo cilmi-baarista iyo macluumaadka ku saabsan horumarinta iyo maaraynta waraabka, kuwaas oo natiijadoodu ka qayb qaadan doonto dardargelinta waxtarka waraabka oo hagaagta, bixinta macluumaad ku saabsan farsamooyin cusub oo habboon oo uu helo waraabku kaas oo keenaysa in beeraha waraabka ku baxa ay helaan wax-soo-saar badan, taya leh oo joogtaysan.

#### *2.5.5.2 Qoraalada Siyaasadda*

Si loo gaaro ujeedada kor ku xusan waxa la qaban doonaa waxyaabaha soo socda:

i. In la dhiso habka maaraynta xogta waraabka

ii. In la furo barnaamij ay Dowlada Federlka Somalia taagereyso oo Dowlad Goboleedyadu ay soo aruurinayaan xogta isticmaalka biyaha, dhacdooyinka cimilada aadka u daran iyo waxtarka waraabka oo loo sii diro Xarunta Xogta Qaranka

iii. In tababar joogto ah la siiyo shaqaalaha xarumaha xogta si loo hormariyo falanqeynta maaraynta biyaha waraabka.

iv. In lagala shaqeeyo hay'adaha iyo mu’asasaadka ay khusayso kor u qaadista xog ururinta hab-dhaqanada cusub ee loo soo bandhigayo iyo tiknoolajiyadaha kharashaadkoodu macquulka yahay.

v. In la baro beeraleyda hababka isticmaalka biyaha ee mashaariicda waraabka ee gobolka laga isticmaalo.

vi. In la hubiyo bilaabidda iyo joogtaynta cilmi-baarista waraabka iyada oo xoogga la saarayo waxqabadka kor u qaadista hawlaha waraabinta.

vii. Taageeridda iyo isku-duwidda tijaabada iyo cilmi-baarista waraabka si loo hormariyo waraabka iyada oo ujeedadu tahay horumarinta wax-soo-saarka dhulka iyo biyaha oo leh qaab joogtaysan.

viii. In la hubiyo in natiijooyinka cilmi-baarista iyo tijaabada waraabka loo diiwaangeliyey si ku haboon iyadoo ujeedadu tahay in la isticmaalo macluumaadka farsamo ee hore loo diyaariyay.

ix. In la horumariyo lana dhiso hab/farsamo ee isku-duwidda iyo faafinta natiijooyinka tijaabada/cilmi-baarista waraabka.

x. In la bilaabo lana xoojiyo cilmi-barista waraabka iyada oo lala kaashanayo daneeyeyaasha ay khuseeyso oo ay ku jiraan mu’sasaadka cilmi-baarista gudaha iyo dibada

## 3. ISKU-DUBARIDKA HAY'ADEED EE FULINTA SIYAASADDA

### 3.1 Kaalimaha iyo Waajibaadka Heerarka kala duwan

#### 3.1.1 Heerka Qaran

Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ayaa ka mas'uul ah hirgelinta iyo isku-duwidda Siyaasadda Qaran ee Waraabka. Wasaaradda Qaranka waxay shaqada qabataa iyada oo si dhow u kaashanaysa Wasaaradaha Beeraha iyo Waraabka ee maaamul goboledyada iyo sidoo kale daneeyeyaasha ay khusayso. Daneeyayaasha waxaa ka mid ah deeq bixiyayaasha, hay'adaha fulinta, ganacsiga gaarka loo leeyahay, mu'asasaadka waxbarashada iyo cilmi-baarista, iyo ururrada bulshada rayidka ah.

Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ayaa hormuud ka ah fulinta Siyaasadda Qaranka ee Waraabka. Wasaaraddu waxay go'aamin doontaa hannaanka siyaasadeed iyo horumarinta, iyo in hadba mar dib-u-eegis lagu sameeyo siyaasadda iyo sharciyada, iyo diyaarinta jawi ku habboon isku-duwidda iyo isdhexgalka qaybaha. Waxay tixgelin doontaa helitaanka halbeegyo iyo qaabab kala duwan ee sharciyaysan oo hadana nidaamsan, taas oo ay ku tiirsanyihiin sharciyo, xeerar, iyo nidaamyo si loo hormariyo waraabka. Siyaasadani waxay aqoonsantahay siyaasadaha kala duwan ee qaybaha, maaddaama ay muhiim u yihiin gaaritaanka ujeedooyinkeeda.

Hirgelinta siyaasaddan ayaa la waafajin doonaa siyaasadaha kale ee qaybaha, waxaana sidoo kale la isku-duwidoonaa hawlaha daneeyayaasha kala duwan ee danaynaya horumarinta qaybta waraabka. Wasaaraddu waxay adeegyo farsamo siin doontaa wasaaradaha heer dawlad goboleed.

Wasaaraddu waxay fulin doontaa wacyi-gelinta iyo adeegyada talobixinta ku saabsan dhammaan dhinacyada horumarinta waraabka, cilmi-baarista, iyo dhisidda awoodda, taas oo ay siin doonto Dowlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya, guddiyada waraabka, ururada isticmaalayaasha biyaha, iyo ganacsiga

gaarka loo leeyahay. Waxay kaloo bixindoontaa taageero farsamo oo ku saabsan baaritaano iyo naqshado faahfaahsan ee kaabayaasha waraabka, diyaarinta iyo habaynta dukumiintiyada qandaraasyada mashaariicda waraabka, dhismaha iyo kormeerka kaabayaasha waraabka, bixinta adeegyada maalgashiga ee isticmaalayaasha waraabka, iyo adeegyada talabixinta la siiyo ganacsiga gaarka loo leeyahay ee beeraha waraabka ku baxa. Wasaaradda Federaalku, iyada oo kaashaneysa Wasaaradaha ay khusayso ee Dawlad Goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka, waxay kor u qaadi doonta Maareynta Khayraadka Biyaha ee Isku-dhafan.

Wasaaraddu waxay udub dhexaad u noqon doonta horumarinta beeraha waraabka ku baxa. Sidoo oo kale, Wasaaraddu waxay mas'uul ka noqon doontaa xaqiijinta isku-duwidda Wasaaradaha/hay'adaha kala duwan sida Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Khayraadka Badda, Wasaaradda Arimaha Bini'aadamnimada iyo Maareynta Musiibooyinka, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Qorshaynta, Dhiirigenlinta Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-u-dhiska, iyo kuwo kale.

Si loo xaqiijiyo guusha dibuhabaynta, gaar ahaan kuwa dhiirigeliya tiknooloojiyada iyo hababka dhaqan ahaan ay beeralaydu u isticmaali jirin, waa lama huraan in siyaasadaha si nidaamsan loo fuliyo. Waa in caddayn iyo cilmi-baaris lagu taageeraa Istiraatijiyadaha maadama tani dhiiri gelinayso isticmaalayaasha biyaha. Intaa waxaa dheer, in la geeyo hab bartilmaameedsanaya isbeddelada ay keeneen dhibaatooyinka ugu daran ayaa waxay u ogolaanaysaa in si tartiib tartiib ah loo soo badhigo lana hirgeliyo dib-u-habeynta siyaasadda.

Wax kasta iyo dhamman horumarinta dib-u-habaynada waraabka ayaa waxaa lala kaashan doonaa ururada isticmaalayaasha biyaha waraabka iyo wakiillada ka socda ganacsiga gaarka loo leeyahay. Horumarinta, dayactirka, iyo fulinta mashaariicda iyo tiknooloojiyadaha ayaa si buuxda looga qayb gelin doonaa beeralayda ku tiirsan waraabka.

Istiraatiijiyadaha habraaca iyo qiimeynta ee meelaha ay siyaasadaha xoogga saarayso ayaa la qaban doonaa iyada oo taageero laga helayo ururrada isticmaalayaasha biyaha, deeq bixiyayaasha, iyo dhammaan mu’asaasaadka ay khuseeyso, hay'adaha, iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay. Meelaha ugu muhiimsan ee isku-duwidda waxaa ka mid ah:

-  Sahanka iyo qiimeynta qaybta waraabka
-  Dhiirigelnta iyo qorsheynta horumarinta iyo maareynta waraabka meelaha muhiimka ah
-  Dhiirigelinta tiknooloojiyadaha waraabka
-  Dhiirigelinta maareynta khayraadka biyaha ee isku dhafan
-  Dhisidda kartida xirfadleyda iyo khubarada waraabka
-  Cilmi-baarista, fidinta, iyo daraasadaha waraabka
-  Wacyi galinta iyo abaabulka ka-faa’iideystayaasha
-  Habdhaqanka maaraynta biyaha waraabka

### 3.1.2 Heer Dawlad Goboleed

Dawlad goboleedyadu waxay kaalin muhiim ah oo sii siyaadaya ka  ciyaari doonaan hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Waraabka. Dawlad goboleedyada waxaa la siiyay mas'uuliyadaha horumarinta iyo hirgelinta hawlgalada waraabka oo ay bixinayaan khubarada hay’adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Dawlad goboleedyadu waxay yeelan doonaan kaalin weyn oo lagu caawindoono beeralayda ee geeddi-socodka guud ee aqoonsiga, hirgelinta iyo maareynta mashaariicda waraabka.

Dawlad goboleedyadu waxay mas'uul ka ahaandoonaan diyaarinta iyo dhaqan gelinta xeer-hoosaadyada waraabka iyo dejinta iyo dayactirka xogta ee horumarinta waraabka. Intaas waxaa dheer, Dawlad goboleedyadu waxay mas’uul ka noqon doonaan tababarka shaqaalaha iyo kuwa ka shaqeeya waaxda waraabka ee arrimaha la xiriira horumarinta waraabka ee heer degmo iyo heer tuulo.

### 3.1.3 Ganacsiga Gaarka loo leeyahay

Ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa kaalin muhiim ah ka qaadan kara horumarinta iyo maaraynta waraabka Soomaaliya. Tan iyo sanadkii 1991[kii] ee burburkii dawladdii dhexe ee Soomaaliya, waddanku wuxuu ka guuray habkii dadweynaha, wuxuuna si buuxda ugu guuray in habka ganacsiga gaarka loo leeyahay uu ka qayb qaato qaybaha kala duwan ay ka mid tahay waraabka beeraha. Sidaas darteed, siyaasaddani waxay tixgelin siineysaa in ganacsiga gaarka loo leeyahay uu ka mid noqdo kana qayb qaato horumarinta iyo maaraynta waraabka.

#### *3.1.3.1 La-taliyayaal iyo Qandaraaslayaal*

**b.** Baaxadda qorshaynta, naqshadaynta, iyo hirgelinta mashaariicda waraabka ee ganacsiga gaarka loo leeyahay ayaa la hagaajin doonaa iyada oo loo marayo adeegyada qandaraaska.

**t.** Ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay ka qaybqaadan doonaan hawlaha waraabka oo ay ka mid yihiin qabashada baaritaano, sahmin, naqshadayn, iyo shaqo dhismo.

**j.** La taliyayaasha (qaranka iyo caalamka) waa la hawl gelin doonaa iyagoo leh waajibaad cad. Ma jiri doono la-taliye shisheeye oo ka shaqeeya qaybta waraabka iyadoo aysan la shaqaynayn la-taliyayaasha wadanka ee ka diiwaan gashan Wasaaradaha Qaranka iyo kuwa Dawlad Goboleedyada. Intaas waxaa dheer, ugu yaraan 30% shaqaalaha muhiimka ah waa inay yihiin muwaadiniin Soomaali ah.

**x.** Ka dib markii la dhamaystiro Nashqadaha faahfaahsan iyo shaqooyinka injineernimada, qandaraaslayaasha ka diiwaangashan Wasaaradaha Qaranka iyo Dawlad Goboleedyada ayaa wada shaqayn doona si ay u dhammaystiraan mashaariicda. Tani waxay isku dhafi doontaa kharashaadkooda iyo waqtiyada fulinta. Qandaraaslayaasha shisheeye waxaa lagu dhiiri gelin doonaa in ay maalgalin wadajir ah la sameeyaan qandaraaslayda dalka.

### *3.1.3.2 Bixiyeyaasha qalabka iyo agabka dayactirka*

**b.** Ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah waxaa lagu dhiirigelin doonaa inay kordhiyaan kaydka qalabka waraabka cusub, agabka dayactirka oo ah halbeegyo la aqbali karo, iyo in tababar la siiyo beeralayda iyo bulshooyinka iibsada qalabka lagama maarmaanka ah.

**t.** Habka qiimeeynta qalabka, dayactirka qalabka, iyo adeegyadu waxay xaqiijindoonaan in beeralayda yar yar ay ka bixi karaan.

### *3.1.3.3 Mu'asasaadka Amaahda iyo Bangiyada*

**b)** Waxaa lagu dhiiri gelindoonaa mu'asasaadka bixiya amaahda inay ka jawaabaan baahida ka-faa'iideystayaasha waraabka yar yar iyagoo bixinaya amaah qalab/agab laga bixi karo si loo helo beer gashiga iyadoo loo marayo ururada bulshada sharciga ah.

**t)** Waxaa lagu dhiiri gelin doonaa mu'asasaadka bangiyada inay aqoonsadaan ururada bulshada dalka iyagoo looga golleeyahay bixinta amaahda si loo hormariyo raasumaalka iyada oo la adeegsanayo shuruudo ay ka bixi karaan beeralayda waraabka yar yar.

### *3.1.3.4 Beeralayda waaweyn iyo ganacsiga*

**b.** Beeralayda ganacsiga iyo kuwa waaweeynba waxaa lagu dhiirrigelin doonaa inay la wadaagaan waayo-aragnimadooda dhanka waraabka beeraha si loo faa'iideeyo bulshooyinka leh beeraha yar yar.

**t.** Qandaraaska beerashadu wuxuu bedel u noqon doonaa ka maarmidda shaqaalaha dheeraadka ah, wuxuu kaloo siin doonaan guryaha wax bedel u noqon kara maaraynta dhulka.

**j.** Beeralayda waaweyn waxay qaadi doonaan mas'uuliyad dheeraad ah oo ku noqonayaan xarumo ay bulshada ku hareereysan ay ka heli karto agabka beer gashiga, fududayn karto kaydinta iyo wershadaynta iyo sidoo kale suuq gaynta wax-soo-saarka.

**x.** Beeralayda waaweyn ayaa lagu dhiirrigelin doonaa in ay maalgashadaan in badan oo ka mid ah beeraha waraabka ku baxa.

### *3.1.3.5 Bulshada rayidka ah*

Dadaalo ayaa loo sameyn doonaa si loo horumariyo iskaashiga iyo wada shaqeynta ururada bulshada rayidka ah. Ganacsiga gaarka loo leeyahay iyo ururada bulshada rayidka ayaa sidoo kale lagu dhiirrigelin doonaa inay bixiyaan adeegyo, qalab, iyo agab lagu horumarinayo beeraha ku baxa waraabka. Waxay ka qayb qaadan doonaan teegirdda heer bulso oo ay ka mid yihiin:

- Dhisidda Aqoonta/tayada
- bandhigga beeraha waraabka ku baxa
- Hirgalinta mashaaricda waraabka yar yar

-  Isku xirka si loo gudbiyo Tiknooloojiyada ama farsamada waraabka
-  Dhiiri galinta iyo maareynta tiknooloojiyadaha yareeya shaqaalaha
-  Caawimaadda Wasaaraddaa mas'uulka ka ah horumarinta beeraha iyo waraabka ee qaybinta beer-gashiga

Wadahadal lala yeesho ururada bulshada rayidka ayaa la bilaabi doonaa, waxaana la abuuri doonaa jawi xoojin doona wadahadaladan si uu uga hawl galo si wax-ku-ool leh iyadoo loo marayo ka qayb qaadasahada barnaamijyada beeraha. Intaas waxaa dheer, waxaa la dhisi doonaa iskaashi lala yeesho ururada bulshada rayidka si looga fogaado in isku hawl la qabto iyo in la dhiirigeliyo inay ka qaybgalaan hirgelinta barnaamijka qaranka ee horumarinta waraabka.

### *3.1.3.6 Ururka Iskaashatooyinka Beeraha*

Iskaashatooyinka Qaranka ee Beeraha, oo ku lug leh waraabka, ayaa waxaa looga baahnaan doonaa inay ka qeybqaataan qaybta qorshaynta iyo dib u eegista waraabka si la isula wadaago macluumaad wax-ku-ool leh.

### *3.1.3.7 Horumarinta iyo Jaalayaasha Hirgalinta*

Waxaa ururada aan dowliga ahayn lagu dhiirigelinayaa inay taageeraan barnaamijyada tijaabada ah, waxayna dhiiri galin doontaa taageerada weyn ee Iskaashatooyinka Beeraha iyada oo loo marayo maalgelinta dowladda iyo deeq-bixiyaha. Dhammaan iskaashatooyinka bilaabaya horumarinta mashaariicda waraabka waa in ay u gudbiyaan qorshahooda Waaxda Waraabka si loo hubiyo raacitaanka halbeegyada iyo tilmaamaha. Intaas waxaa dheer, inuu jiri doono kormeer iyo qiimeyn lagu sameyn dooo waaxda waraabka. Filashooyinka Hirgelinta jaalayaasha waa sida soo socota:

**b.** Taageerida ka socota jaalayaasha horumarinta ee kor loogu qaadayo waraabka waxaa hagi doona siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha ku xusan siyaasaddan.

**t.** Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay tilmaamaysaa meelaha mudnaanta leh ee maalgalinta jaalayaasha horumarinta. Isla mar ahaantaana, waxay xusi doonaan meelaha ay xiiseynayaan si loo waafajiyo baahiyaha qaran oo ay la socoto meelaha la door bidayo in la taageero.

**j.** Jaalayaasha Horumarintu waxay isku duba ridi doonaan taageeridda loogu talagalay waaxda waraabka, arintan darteed, waxaa jira baahi loo qabo isku-duwe ka socda Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ee maalgelinta waraabka.

**x.** Sanduuqa waraabka waxaa loo samayn doonaa maal-galin wax-ku-ool ah oo ku saabsan horumarinta waraabka oo ay ka mid yihiin DFS iyo jaalayaasha horumarinta.

**Kh.** DFS waxay mas'uul ka noqoneysaa maareynta lacagta iyadoo loo marayo barnaamijyada maalgashiga waraabka.

# 4. ISKU-DUWIDDA, KORMEERIDDA IYO QIIMEYNTA

## 4.1 Hannaanka Isku-duwidda

Waxaa muhiim ah in la isku duwo dhammaan dhinacyada siyaasadahan inta ay socoto hirgelinta iyo fulinta. Wasaarada u xil saaran horumarinta waraabka ayaa mas'uul ka ah isku-duwidda dhammaan daneeyayaasha siyaasaddan. Wasaaradaha hogaamiya qaybta beeraha iyo waraabka ee heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleed waxay leeyihiin kaalin muhiim ah oo ay ku hubinayaan hab raacyo dhamaystiran oo lagu fulinayo siyaasadda. Isku-duwid habboon ee hirgelinta ayaa horseedi doontaa wacyi gelinta daneeyayaasha si loo helo faa'iidooyin ay ka mid tahay isticmaal habboon oo dhamaystiran ee dadaalada iyo khayraadka laga helayo dhamaan jiliyaasha. Tani waxay ka hortegaysaa in daneeyayaashu ay hal shaqo wada qabtaan, khilaafaadka ka dhasha isticmaalka khayraadka iyo waxqabadyada, iyo xaqiijinta hab raacyo dhamaystiran ee horumarinta khayraadka dhulka iyo biyaha iyo maareynta khayraadka biyaha isku dhafan.

## 4.2 Kormeerka iyo Qiimeynta

Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka ayaa mas'uul ka noqon doonta kormeerka iyo qiimeynta iyada oo kormeeraysa warbixinta saddex biloodlaha ee hirgelinta dib-u-habeynta siyaasadda oo lala wadaagayo dhammaan daneeyayaasha ay khuseyso. Mu'asasaadka, Hay'adaha iyo ururada isticmaalayaasha biyaha waraabka ayaa mas'uul ka ah inay lawadaagaan natiijooyinka wakiillada dawlad goboleedyada ee ay magacaawday Wasaaraddu.

Warbixin kasta ka dib, wakiilada ay khusayso ee qaybta waraabka si ay uga taliyaan xalalka lagama maarmaanka ah iyo in la hirgeliyo wajiga xiga ee aagga siyaasaddu xoogga saarayso.

Siyaasadda waa in dib loo eegaa loona hubiyaa hadba sida loogu baahdo si sanadle ah mudada shanta sano ee ugu horreysa. Haddii aagga xoogga la saarayo ay ku dhacaan

horumar la taaban karo, ama guul darrooyin, waxaa markaa suurtagal ah in la sameeyo isbeddelo kadib markii ay sidaa ku taliso Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka.

Waxaa la kormeeri doonaa hirgelinta siyaasadda iyada oo loo marayo nidaamka kormeerka iyo qiimeynta oo ay la socoto habka warcelinta lagama maarmaanka u ah si loola socdo qaybta halbeegyada waxqabadka. Waxaa la geli doonaa kulamada wadajirka ee dib-u-eegista si la isula wadaago xogta iyo ka qaybgalka wax-ku-oolka ah ee daneeyayaasha si loo hormariyo waraabka.

Wasaarada mas'uulka ka ah waraabka ayaa isku duwi doonta isla markaana hogaamin doonta nidaamka kormeerka iyo qiimeynta ee siyaasadda, waxay kaloo hubin doontaa in waqtiga loogu talagalay lagu soo gudbiyo warbixinta iyo faafinta natiijooyinka. Warbixinta habka kormeerka iyo qiimeynta ee waraabka waxaa loo diyaarin doonaa si sanadle ah. Dhammaan hay'adaha fulinaya barnaamijyada la xiriira siyaasaddan waxay si joogto ah u wargalindoonaan hay’adaha ay xiriirka la leeyihiin. Waxaa natiijooyinka habka Kormeerka iyo Qiimeynta loo isticmaali doonaa in lagu wargaliyo dhammaan daneeyayaasha waraabka si ay u saameeyaan habka qorsheynta iyo naqshadaynta barnaamijyada, iyo sidoo kale maaraynta khayraadka.

Siyaasaddan ayaa dib loo eegi doonaa iyada oo loo eegayo wareegga shanta sano ee lagu dhisay nidaamka dejinta siyaasadda. Si kastaba ha ahaatee, siyaasaddan, ama qayb ka mid ah, ayaa waxaa laga yaabaa in wax laga beddelo haddii ay jiraan isbeddel weyn oo ka jira qaabka lagu shaqeynayo inta lagu gudajiro hirgelinta. Wasaarada mas'uulka ka ah waraabka ayaa dib u eegi doonta siyaasadda.

### 4.3 Arrimaha Udub-Dhexaadka ah

Maaraynta saxda ah ee ilaha biyaha loo adeegsado qaybta waraabka ayaa muhiim u ah marka la eego arrimaha gundhigga ah kuwaas oo uga sii daraya dhibaatooyinka la xiriira helitaanka biyaha waraabka. Marka la eego bulshooyinka reer miyiga ee haysta ilo xadidan, waa in xisaabta lagu darsadaa arrimaha udub-dhexaadka ah marka la fulinayo

lana qiimeynayo dib u habeynta siyaasadda. Arrimaha diirada la saarayo waxaa ka mid ah:

i. Dhacdooyin Cimilada daran

ii. Caafimaadka

iii. Isku dhaca iyo amniga

iv. Aqoon la’aanta